# Bilaha xurmaysan waa dhanbaal nabadeed ku socota insaaniyada

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

**{إِنَّ عِدَّةَ الشُّهُورِ عِنْدَ اللَّهِ اثْنَا عَشَرَ شَهْرًا فِي كِتَابِ اللَّهِ يَوْمَ خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ مِنْهَا أَرْبَعَةٌ حُرُمٌ ذَلِكَ الدِّينُ الْقَيِّمُ}،**

**(tirada bilaha Eebe agtiisa waa Laba iyo toban kitaabka Eebe dhexdiisa taniyo maalintuu abuuray samooyinka iyo dhulka, waxaana ka mid ah afar xurmo (gaara) leh waana taas diinta toosan)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Waxaa ka mid ah fadliga Allaha sarreeya oo addoomihiisa uu siiyay inuu u doortay waqtiyo khayr iyo barako leh; oo xasanaadka lagu laablaabo, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa (SW):

**{وَذَكِّرْهُمْ بِأَيَّامِ اللَّهِ}**

**(kuna waani «xusuusi» Nicmooyinkii Ilaahay)**, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنَّ لِرَبِّكُمْ (عزَّ وجلَّ) فِي أَيَّامِ دَهْرِكُمْ نَفَحَاتٍ، فَتَعَرَّضُوا لَهَا، لَعَلَّ أَحَدَكُمْ أَنْ تُصِيبَهُ مِنْهَا نَفْحَةٌ لا يَشْقَى بَعْدَهَا أَبَدًا).**

**(Rabbigiina – cazza wajalla – wuxuu ku leeyahay maalmaha waqtigiina barakooyin ee u banbaxa, waxaa laga yaabaa midkiina inay soo gaarto barako oo kaddibna waligiisa uusan hoogi doonin)**

Waxaa ka mid ah waqtiyadan iimaaniga ah bilaha xurmada leh, Alle (caz wa jalla) si duuduuban ayuu ugu tilmaamay oraahdiisa:

**{إِنَّ عِدَّةَ الشُّهُورِ عِنْدَ اللَّهِ اثْنَا عَشَرَ شَهْرًا فِي كِتَابِ اللَّهِ يَوْمَ خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ مِنْهَا أَرْبَعَةٌ حُرُمٌ ذَلِكَ الدِّينُ الْقَيِّمُ فَلَا تَظْلِمُوا فِيهِنَّ أَنْفُسَكُمْ}،**

**(tirada bilaha Eebe agtiisa waa Laba iyo toban kitaabka Eebe dhexdiisa taniyo maalintuu abuuray samooyinka iyo dhulka, waxaana ka mid ah afar xurmo (gaara) leh waana taas diinta toosan ee ha dulmiyina dhexdooda naftiinna**) nabigeenana wuxuu ugu caddeeyay khudbada xajka sagootiska si faahfaahsan markuu yiri:

**(أَلا إِنَّ الزَّمَانَ قَدْ اسْتَدَارَ كَهَيْئَتِهِ يَوْمَ خَلَقَ اللَّهُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ، السَّنَةُ اثْنَا عَشَرَ شَهْرًا، مِنْهَا أَرْبَعَةٌ حُرُمٌ، ثَلَاثَةٌ مُتَوَالِيَاتٌ: ذُو الْقَعْدَةِ وَذُو الْحِجَّةِ وَالْمُحَرَّمُ، وَرَجَبُ مُضَرَ الَّذِي بَيْنَ جُمَادَى وَشَعْبَانَ).**

**(Samanka wuxuu usoo wareegtay sidiisa oo kale, maalinta Ilaahay abuuray samadaha iyo dhulka, sanadka waa labo iyo toban bilood, waxaa ka mid ah afar bilood xurmo leh, seddex way isku xigaan: Dulqacda, iyo Dulxijja iyo Muxarram, iyo Rajabka Mudar oo u dhexeeya Jumaadaa iyo Shcbaan)**

Bilaha hurmaysan Alle (caza wa jalla) agtiisa meel weyn ayay ka taagan yihiin, waxaa loogu bixiyaya xurum weynida xurmada ay leeyihiin awgeeda; sidaa daraadeed shareecada islaamka si daran ayay u xarrimtay in dagaal lagu dhex kiciyo iyo in xurmadaha lagu xadgudbo, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{يَسْأَلُونَكَ عَنِ الشَّهْرِ الحَرَامِ قِتَالٍ فِيهِ قُلْ قِتَالٌ فِيهِ كَبِيرٌ}،

**(waxay ku warsan Dagaalka Bisha xurmaysan (Rajab iyo wax la mid ah waxaad dhahdaa dagaalku dhexdiisa waa waynyahay)**

Bilaha xurmaysan waxay u xambaarsan yihiin insaaniyada oo dhan dhanbal nabadeed in islaamka uu yahay diinta nabadda, salaamna wuxuu ka mid yahay magacyada Alle, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{هُوَ اللَّهُ الَّذِي لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الْمَلِكُ الْقُدُّوسُ السَّلَامُ}

**(Ilaahay isaga mooyee Eebe kale ma jiro, waa bqor daahir ah, nabadgeliye)**, nabigeenana (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) waa nabiga naxariista iyo nabadda, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{وَمَا أَرْسَلْنَاكَ إِلَّا رَحْمَةً لِّلْعَالَمِينَ}

**(kuumaanu dirin raxmad inaad aduunka oo dhan u noqoto mooyee)** nabigeena sharafta badanaa (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) ducadiisa waxaa ka mid ahayn salaad kaste dabadeed:

(اللَّهُمَّ أَنْتَ السَّلَامُ وَمِنْكَ السَّلَامُ تَبَارَكْتَ يا ذَا الْجَلَالِ وَالإِكْرَامِ).

**(Ilaahayow adaa ah nabadgeliye nabaddana xaggaga ayay ka haatay, waad barako badan tahay midka weyniada iyo karaameynta lahow)**

Islaamka ma aha mid xiiso u qabo dagaal iyo diig daadin, hasayeeshee wuu iska reebayaa intuu karo wuxuuna u iilanayaa nabadda wuuna adkaynayaa, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{وَإِنْ جَنَحُوا لِلسَّلْمِ فَاجْنَحْ لَهَا وَتَوَكَّلْ عَلَى اللهِ إِنَّهُ هُوَ السَّمِيعُ العَلِيمُ}،

**(Hadday u Iishaan Gaaladu Nabad u lilo adna talana Saaro Eebe, Illeen isagaa uun Maqla waxna og)**, wuxuu

leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(لاَ تَتَمَنَّوْا لِقَاءَ الْعَدُوِّ، وَسَلُوا اللهَ الْعَافِيَةَ، فَإِذَا لَقِيتُمُوهُمْ فَاصْبِرُوا)،**

**(Ha doonina inaad cadowga la kulantaan, Ilaahay weyddiista caafiyada, hadaad la kulantaana sabra)**

Dhanbaalka islaamka waa dhanbaal nabadeed iyo isku xirnaan, hadafkiisana waa liibaanta dadka oo dhan, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَاكُم مِّن ذَكَرٍ وَأُنثَى وَجَعَلْنَاكُمْ شُعُوبًا وَقَبَائِلَ لِتَعَارَفُوا إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِندَ اللَّهِ أتقاكم إن الله عليم خبير}.**

**(Dadow waxaan idinka abuurnay lab iyo dhaddig, waxaanna idinka yeelnay shucuub iyo qabiilooyin si aad isu aqoonsataan, ruuxase ugu sharaf badan Alle agtiisa waa ka idiinku dhawrsasho badan, Allana wax walba waa ogyahay)**

*****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan ugu sharafta badan khalqiga sayidkeena Muxammad iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

Weynaynta bilaha xurmada leh waxay keenaysaa in laga joogsado dhammaan argagxiska iyo xagjirnimada iyo daadinta dhiiga dadka degan iyo argagixintooda, sidoo kale waxay keenaysaa in Alle lala aado daaco badan, waxaa nagu waajib ah inaan ku camirno bilahan iyo maalmahan dadaal xagga cibaadada, iyo daahirinta nafta oo lagu daahirinayod daacooyinka iyo cibaadaadka, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَافْعَلُوا الخَيْرَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ}**

**(Fala Khayrka waxaad u Dhawdihiin inaad Liibaantaane),** wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(صُمْ مِنَ الحُرُمِ وَاتْرُكْ، صُمْ مِنَ الحرُم وَاترُكْ، صُمْ مِنَ الحرُمِ وَاتْرُكُ).**

**(Bilaha xurmaysan maalin ka soon maalinna ka tag, bilaha xurmaysan maalin ka soon maalinna ka tag, bilaha xurmaysan maalin ka soon maalinna ka tag)**

Bilahan xurmaysan waxaa ka mid ah bisha Rajab, waxaana loogu bixiyay Rajab tarjiib bay ka timid waxaana laga wadaa : weyneyn, carabta waxay ku magacaabi jireen Al-asam, maxaayeelay maysan maqli jirin cod dagaal, waa bisha xambaarsan mucjisada israha iyo micraajka ee nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), waa furaha bilaha khayrka iyo barakada, wuxuu leeyahay Abuubakar Albalkhiy (Alle ha u naxariistee): “ **bisha Rajab waa bil beerasho, bisha Shacbaanna waa bisha waraabinta beerta, bisha Ramadaanna waa bisha gurashada beerta**”

Maxaa ka qurux badan inaan kaga faa’ideysano bilaha xurmada leh daacada Alle (caza wa jalla) camiraadda dhulka, sugidda shaqada, badinta khayrka, quudinta cuntada, iyo faafinta iskaashiga iyo isunaxariisashada, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(أَحَبُّ النَّاسِ إلى اللهِ أنفعُهم للناسِ، وأَحَبُّ الأعمالِ إلى اللهِ (عزَّ وجلَّ) سرورٌ تُدخِلُه على مسلمٍ، تَكشِفُ عنه كُربةً، أو تقضي عنه دَيْنًا، أو تَطرُدُ عنه جوعًا، ولأَنْ أمشيَ مع أخٍ في حاجةٍ؛ أَحَبُّ إليَّ مِنْ أَنْ أَعْتَكِفَ فِي هَذَا المَسْجِدِ - يَعْنِي: مَسْجِدَ المَدِينَةِ - شَهْرًا، وَمَنْ كَظَمَ غَيْظَهُ وَلَوْ شَاءَ أَنْ يُمْضِيَه أَمْضَاهُ؛ مَلأَ اللهُ قَلْبَهُ يَوْمَ القِيَامَةِ رِضًا، وَمَن مَشَى مَعَ أَخِيهِ فِي حَاجَةٍ حَتَّى يَقضِيَها لَهُ؛ ثَبَّتَ اللهُ قَدمَيْهِ يَوْمَ تَزُولُ الأَقْدَامُ).**

**(Dadka waxaa loogu jecel yahay xagga Alle kuwa ugu dadka anafac badan, camalna waxaa loogu jecel yahay Alle agtii qof muslin aad farxad galinayso, ama aad kurbo ka feydayso, ama aad deyn ka gudayso, ama aad gaajo ka eryinayso, inaan ula socdo walaalkayga dantiisa ayaa loogu jecel yahay inaan masjidkan bil ku ictikaafo – wuxuu ka wadaa msajidka Madiina-, qofkii cabburiyo ciilkiisa hadduu rabi lahaa inuu fuliyo fulin karo Alle ayaa ka buuxinaya xabadkiisa raalli maalinta qiyaame, qofkii ula socdo walaalkiisa dan ilaa uu u xasiliyo Alle ayaa ku sugaya cagtiisa siraadka maalinta ay ku sanbariiraxdaan cagaha).**

**Ilaahayow noo barakeey Rajab iyo Shacbaan Ramadaanna na gaarsii**